

# XUQUUQDA CADAALADDA GURYAHA EE DADKA KA BADBAADA RABSHAD GURI



## TANI MA KUGU DHACDAY?


- Mulkiilahaaga oo diida in uu kaa ijaaro iyadoo sobobtu tahay adigoo ah ama ahaa qof dhibaato ka soo gaartay rabshad guri ama iyadoo sobobtu tahay adigoo taageero dhanka ijaarka ah ka hela Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon (DHS) ama hay'ad kale;
- Adigoo lagu sheego in aad bixiso burburka hantida soo gaara ee uu keenay qofka dhibaataada geysta;
- Mulkiilahaaga oo diida in uu si degdega u beddelo qufulkaaga ama kuu diida in aad adigu beddesho;
- Mulkiilahaaga oo diida in aad si xor ah uga tegto heshiiskaagii ijaarka ama heshiiskaagii bixinta lacagta ijaarka;
- Arjigaagii codsi ee guriga oo la diido iyadoo sobobtu tahay ahaanshaha qof dhibaato ka soo gaartay rabshad guri oo laga helo taariikhda dambi gelida;
- Mulkiilahaaga oo isticmaala siyaasad (aan u dulqaadasho lahayn" oo ka dhan ah dambiga si uu kuu saaro iyadoo sobobtu tahay adigoo ah qof dhibaato ka soo gaartay rabshad guri;
- Iyadoo lagaa saaray guriga iyadoo sobobtu tahay adigoo si isdaba joog ah u wacay booliiska sobobto ah iyadoo ay jirtay dhibaato rabshad guri iyo deriska oo ka cawday.



Qofka ka badbaaday dhibaato guri ahaan, weerar dhanka galmada ah ama dabagal, waxaad xaq u leedahay in aad ku noolaato meesha aad rabto iyadoon kala takoorid lagugu samayn. Mulkiile maaha in uu si kale kuula dhaqmo iyadoo sobobtu tahay adigoo ah ama ahaa qof dhibaato ka soo gaartay rabshad guri, weerar dhanka galmada ah ama dabagal.

## Maxaad samayn kartaa?

- Kaydi diiwaannada dhamaan warqadaha – fariimaha. ogaysiisyada, shatiyada, fariimaha telefoonka, qandaraasyada, warqadaha, iwm.
- Sawir ka qaad dhibaataada jirta haddii aad karto.
- Hel magacyada iyo lambarada dadka ku lug yeeshay.
- Hel lambarada – taariikhda ay wax dhaceen, cinwaanka halka ay ka dhacday, iyo kharashka.
- La hadal deriska – ayaa kale ee ay tani ku dhacaysaa? Yaa arkay markii ay dhacaysay?



## GUDDIGA CADAALADDA GURYAHA OREGON WAXAY HALKAN U JOOGAAN INAY WAX CAAWIYAAN!

Haddii aad u malaynayso in kala takoorid lagugu sameeyay, ama aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, waxaad wacdaa khadkayaga **1-800-424-3247**, sii gudbinta 2, ama booqo website-kayaga **www.fhco.org**.

Badbaadadaadu waa waxa ugu mihiimsan. Haddii weerar lagu geystay – **wac 911** si aad gargaar u hesho.

*Golaha Cadaaladda Guryaha Oregon (FHCO) waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn, waa hay'ad aan dawli ahayn oo xuquuqda bulshada u qaabilsan oo u adeegaysa Oregon.*



**Adeegyadan oo qaab kale u qoran iyo turjumaad ayaa la helayaa.**

Shaqada bixisay aasaaska daabacaadani waxaa lagu taageeray dhaqaale lacag laga helay Wasaarada Guryaha iyo Horumarinta Magaalada. Waxyaalaha ay ka kooban tahay iyo waxyaalaha lagu ogaaday shaqada waxaa loogu tala galay dadweynaha. Qoraaga iyo daabacaha ayaa si gaar ah uga mas'uul ah sax ahaanshaha warbixinnada iyo sharaxaadaha